

244_Toimi näin_4_11
[somali]

Miyaad ka shakisantahay in aad qaadday cudurka fayruska Korona?

Calamaadaha fayruska Korona waxay u egyihiin kuwa hargabka iyo cudurka caloosha

Calamaadaha cudurka fayruska Korona waa tusaale ahaan xummad, qufac, madax xanuun, lablabbo, shuban, murqa xanuun, dhuun xanuun, hargab, neef qabatoon iyo urta ama dhadhanka oo luma. Baaritaanka fayruska Korona waxaa loo dirayaa dhammaan dadka qaba astaamaha cudurka fayruska Korona.

Ka samee qiimeynta calaamadaha cudurka cinwaanka Omaolo.fi

Adeegga Omaolo waxaad ka heleysaa tilmaamaha waxyaabaha aad qabanayso oo calaamadahaada ku salaysan. Haddii ay calaamadahaagu khafiif yihiin, waxaad wakhtiga baaritaanka fayruska Korona qabsan kartaa adigoo isticmaalaya Omaolo. Xusuusinta wakhtiga ballanta waxaad ku heleysaa farriin-qoraal ah. Haddii ay calaamadahaagu daran yihiin, qof xirfadle ah waa in uu ka gungaaraa xaaladdaada. Waxaad markaas qiimeynta calaamadahaaga u diri kartaa xirfadle, kaas oo kula soo xiriiraya.

Si aad u samayso qabsashada wakhtiga iyo la xiriiridda xirfadlaha waa in aad si elektroonig ah isugu caddaysaa tusaale ahaan aqoonsiga bangiga.

Waxaad dooran kartaa goobta qaadista saamiga ee adiga kugu habboon, kuwaas oo meelo badan Helsinki uga yaal. Wakhtiga marka aad qabsanayso ayaad heleysaa macluumaadka ku saabsan goobaha saamiga lagu qaado.

Waxaad marka aad iscaddayso wakhti ka uga qabsan kartaa naftaada iyo weliba cunuggaada kayar 16 sano.

Waxaad sidoo kale wici kartaa rugta talabixinta fayruska Korona ee Helsinki, tel. 09 310 10024 (maalin kasta saacadda u dhexeysa 8–18).

Rugta talabixinta fayruska Korona waxaad naftaada ama cunuggaada uga qaban kartaa wakhtiga baaritaanka fayruska Korona.

Haddii aadan tegi karin baaritaanka Korona ee laguugu qabtay, baaji wakhtiga adigoo raacaya farriinta xoojinta wakhtiga ballanta ee aad heshay.

Sidan samee marka aad baaritaanka imaanayso

- Isticmaal af-shareerka marka aad baaritaanka fayruska Korona u socota iyo marka aad ka soo baxdo.
- Ku dadaal nafaadda gacmaha ee wanaagsan.

244_Toimi näin_4_11
[somali]

- Ku qufac kuna hindhis safaleetiga diifka ee halka mar la isticmaalo ama laabatada xusulka.
- Dadka kale u jiros masafo labo mitir ah.

Baraha qaadista saamiga ee Drive-in waxaa baabuurta ka sokow lagu imaan karaa baaskiil ama socod.

Bukaannada Koronaha qaba waxaa lagu daryeelaa isbitaalka Laakso iyo Malmi

Helsinki waxaa bukaannada qaba calaamadaha cudurka hab-dhiska neefmareenka, kuwaas oo u baahan qiimeynta dhakhtarka lagu daaweynayaa rugaha caafimaadka Korona ee Laakso (Lääkärinkatu 8R) iyo Malmi (Talvelantie 4) maalmaha shaqada saacadda u dhexeysa 8–16. Rugaha kale ee caafimaadka laguma daaweynayo bukaannada qaba calaamadaha habdhiska neefmareenka sare.

Wac marka hore rugta talabixinta fayruska Korona, tel. 09 310 10024, haddii aadan tilmaanbixinno rasmi ah ka helin adeegga Omaolo. Macaamiisha waxaa loogu adeegayaa sida ay u kala daran yihiin.

Inta badan dadka uu u jirrada fayruska Korona waxay ku bogsoodaan todobaad nasasho guri ah iyagoo aan u baahan daryeel dakhtar. Haddii loo baahdo waxaa astaamaha cudurka lagu yareyn karaa daawooyinka xanuunka.

Marka ay rugta talabixinta fayruska Korona ay xirantahay calaamadaha koronaha u egna ay yihiin kuwa qafiif, iska sug maalinta xigta. Haddii arrintu aanay sugi karin furitaanka rugta talabixinta Koronaha ama ay arrintu tahay **cudurka kale oo degdeg ah**, waxaa kuu adeegaya Caawimaadda heeganka, tel. 116 117.

Marka ay jirto xaalad degdeg ah, wac 112.